



CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

Talooyin Kooban

Dhaqanka ugu fiican oo kaa taagereya sida lagu hormarinayo xirfadaha xiriirka



Horumarka hadalka iyo luuqadda waxaa lagu kobcin karaa in lagu dabbakho xiriirka iyo hawlo caada ah cunugga macna ugu

fadhiya. Kuwaan soo socda waa tusaalooyin qeexaya dhaqanka ugu fiican oo tageereya in la hormariyo xirfadaha xiriirka markii lala shaqaynayo dhalaanka yar yar iyo kuwa socod baradka ah.

- Xoogga saar maalin kasta in aad cunug kasta xiriir lasamaysid iyo inaad noqotid qof lafahma cunugga luuqadda.
 - Cunuga wuxuu rabayaa in uu kula hadlo markuu dareemo in uu joogo meel aamin jacayl nah uu ka jiro.
- Caruurta had iyo jeer way hadlayaan hadii ay ogaadaan isu dayida dhexgalka ay la imaanayaan in uu yahay mid wax ku ool ah.
- Noqo mid jawaaba kuna dhiiragaliya qofba mar in uu markiisa wax sameeyo.
 - Ka caawi caruurta in ay ereyo isticmaalaan iyo xiriir.
 - Markii loo jawaabo caruurta waxay ogaanayaan in ay hadii ay xiriir ama hadal layimaadaan ay baahidooda lakaafinayo.
 - Marka aad cunuga u jawaabaysid sug cunugga markiisa ha hadlee asagoo isticmaalaya cod, erey ama jumlad.
 - Qofba markiisa in uu hadlo waxay baraysaa cunugga xeerarka bulshada ay ku sheekeysato.
- Ereyo cusub beey baranayaan markii shaqaaluhu ay caruurta sugaan in qofba markiisa hadlo.
- Kajawaab xiriirka aan hadalka lahayn
 - Dhalaanka yar yar siyaabo badanbeey dadka ola xiriiraan. Tusaale ahaan markay daalaan ama caajisaan,weey sii jeesanayaan markay rabaan wax kaduwan waxa ay samaynayaan ama in ay kadaalaan, iyo in ay dhabarka godaan markii ay xanaaqaan ama ciriiri dareemayaan. In laga jawaabo waxa uu kutusayo cunugga waxay xaqiijinaysaa in qofka cunuga hayya uu yahay qof diyaar u ah in uu cunuga xiriir lasameeyo.
 - Dhalaanka yar yar ee loo jawaabo waxay hadiiba bilaabaan in ay hadaaq wax qofka ugu sheegaan.
- Badso isticmaalka isla hadalka ama barbar hadalka si cunugu ay erayada macnahooda uu u fahmo.
 - Isla hadalku waa markuu qofka cunuga xanaaneeya uu cunugga u sharaxo waxa uu asagu markaa samaynayo. Tusaale, adigoo cunuga qaadaya baad waxaad leedahay, "Waa markii xafaayada lagaa badali lahaa. Waan ku qaadayaa waxaana kusaarayaa miiska wax lagu bedelo. Ma rkaan kuu galiyo xafaayad qalalan raaxaad dareemaysa..."
 - Barbar hadalku nah wuxuu dhacaa markii lasheego waxa uu cunugu uu samaynayo markaa. Tusaale ahaan,

"Waxaad laciyaaraysaa daanyeerkaa, waxaad isticmaashay gacanta afkuu kuugu jiraa."

- Kulahadal caruurta ereyo hodan ah oo kala duwa.
- Tirsiga iyo taayaha wada hadalka wuxuu raad ku yeelanayaa sida dhalaanka yar yar iyo kuwa socod baradka ah ay hadalka ku bartaan.
- Barashada xiriirka ee caruurta yar yar wuxuu ku xiranyahay tirsiga ereyada, nooca ereyada iyo inta jeer ay lasheekeestaan ama xiriir wanaagsan ay malin kasta caruurto layeelato shaqaalaha xanaaneeya.
- Isticmaal afartaan qaab:
 - Ku dhiiragali caruurta in ay ku xiriiraan dhagaysi, adigoo u jawaabaya iyo in aadan saxin hadalkooda.
 - Balballari macnaha ereyada iyo iyo nadaamka ereyada markii aad lasheekeysanaysid.
 - Faahfaahin dheeraad ah kasii ereyada ama jumlooyinka adigoo ku dabbakhaya wixii uu cunugu yiri.
 - Dheeree codka, ereyada iyo jumlooyinka adigoo ku daraya cod, erey, erey cusub ama jumlo dheer - cunuga waxa uu yiri adna dheh siina balbalaari wixii uu yiri.
- Kafaa ii dayso xeeladaha dareenka wada jirka ah adiga oo xoogga saaraya waxa cunugu uu fiirinayo, uu xiisaynayo ama uu lamacaamilayo markaa.
 - Dhalaanka yar yar iyo kuwa socod baradka ah waxay wax baran ogyihiin markii qofka xanaaneeya uu ka hadlo waxay markaa ay xiisaynayaan.
 - Hubi cunugu in uu kusalayn karo waxaa loo yaqaan shay kasta. Isticmaal hadal macquul ah.
 - Markii uu qofka caruurta xanaaneeyo uu macnaha ereyada laga hadlayo si

faahfaahiyo, waxa laga hadlayo cunugu wuu xiisaynaya wuuna si dhagaysanayaa asagoo sii.

- Suaalo isticmaal.
 - Suaalaha waxaa loo isticmaali karaa in hadal lagu furo ama xog lagu helo.
 - Isticmaal su'aalo jawaabo dheer leh (ama jawaabo hal erey ka badan yeelan kara) iyo suaalo doorasho kusalaysan.
- Kudhagayso indhahaaga.
 - Markaad caruurta lamacaamilaysid si xooji xiisaha iyo dareenka adigoo muujinayaa in aad cunuga u soo jeedid.
- Wax u aqri, uhees, faraha kula ciyaar iyo ciyaarta bulshada.
 - Barashada luuqadda xiiso u yeel.

Xog dheeraad ah

Center for Disease Control and Prevention
www.cdc.gov

Talking is Teaching
<http://talkingisteaching.org>

Zero to Three
<http://www.zerotothree.org>

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo
www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.